

“Cod Siinta Kuwa Marar Dhif ah uun La Maqlo”

Ka Wakiil ahaansho Wax ku ool ah ee Geedi Socodka

Xukminta Daawaynta

Eeg Xeerarka Minnesota ee Anshaxa Xirfadeed, Sharciga Xukminta Daawaynta iyo Daawaynta ee Minnesota, iyo Xeerarka Gaarka ah ee Nidaamyada Geedi-Socodka Xukunka Maxkamada ee hoos yimaada Sharciga Xukminta Daawaynta iyo Daawaynta ee Minnesota.

Maxaan ka filan karaa qareenkayga?

Qareenkaagu waa inuu kuu ahaadaa mid si adag kuugu doodaya geedi socodka xukunka daawaynta.

- Qareenkaagu waa inuu yaqaano sharciga iyo xeerarka maamulaya xukunka daawaynta.
- Qareenkaagu waa inuu kugu matalo adiga dhammaan dhagaysiyadaada maxkamada ee xukminta daawaynta aan ka ahayn haddii ay maxkamada sharcigu u ogolaato in uu ka baxo. Qofkani wuxuu sii ahaan doonaa qareenkaaga illaa amarka daawayntu dhammaado.

Qareenkaagu waa inuu kuu sharxaa howsha amarka daawaynta madaniga ah.

- Kahor Dhageysiga Hordhaca ah (oo laqabto 72 saacadood gudahood markii lagugu xiray xukun maxkamadeed), qareenkaagu waa inuu kuu sharxaa nidaamka howsha xukminta daawaynta.
- Qareenkaagu waa inuu dib u eegis ku sameeyo codsiga iyo dhammaan dukumiintiyada taageeraya. Waa inaad faham buuxa ka hesho fursadahaaga si aad u xalliso arrinta, waxa la filan karo wakhtiga dhagaysiga, iyo in aad si buuxda ugu diyaar garowdo inaad ka markhaati furto dhagaysiga.
- Qareenkaagu waa inuu ku siiyaa macluumaad ku saabsan xuquuqdaada. Xuquuqdaas waxaa ka mid ah xaqqa aad u leedahay in aad markhaati furto, xaquuqda aad u leedahay baare labaad, xaq u lahaanshaha markhaatiyaasha iyo xaquuqda su'aalo baaris ah in aad ku waydiiso.

Qareenkaagu waa inuu ku dhagaystaa.

- Waa inaad ku lug lahaataa dhammaan dhinacyada difaaca kiiskaaga. Waxaad xaq u leedahay in lagu dhagaysto oo aad cod ku yeelato howsha. Haddii aad tilmaan ka bixiso meelaha soo socda, qareenkaagu waa inuu raaco tilmaamahaaga:
 - A. yoolka xalka ugu dambeeya ee qaraarka iyo xalka go'aamada aad diiddo;
 - B. Ka tanaasulka xaq aad u leedahay ka qaybgalka dhagaysiga;
 - C. u markhaati furka naftaada; iyo
 - D. dalbashada dhagaysi deg deg ah ama ogolaanshaha sii socoshada.
- Haddii aadan ka dhiiban fikrad dhan kasta oo ka mid ah dacwadaha, qareenkaagu waa inuu qaato jago ilaalinaysa xuquuqdaada.

Qareenkaagu waa inuu dib u eegis ku sameeyo diiwaanada oo uu waraysto markhaatiyaasha laga yaabo inay taageeraan booskaaga dhagaysiga xukunka daawaynta.

- Qareenkaagu waa inuu wakhti galiyo in uu dib kuula eego dhammaan dokumentiyada, oo ay kujiraan diiwaanada caafimaadka, warbixinta baaritaanka codsiga kahor, iyo codsiga.
- Qareenkaagu waa inuu raadiyo xubnaha qoyska, asxaabta, u doodayaasha iyo kuwa kale ee siin kara macluumaad taageeraya booskaaga. Waxaad ku caawin kartaa adiga oo siiya qareenkaaga magacyada shaqsiyaad ka warqaba xaaladaada.

Qareenkaagu waa inuu indha indheeyo dhammaan waxyaabaha beddelaada ah ee ka xanibaada yar.

- Sharci ahaan maxkamadu waa inay tixgelisaa beddelaada ka xanibaada yar xukminta. Haddii ay maxkamadu go'aansato in ay muhiim tahay in lagu xukmiyo, maxkamadu waa inay kugu xukmiso xarunta daawaynta ee xanibaada yar ama barnaamij dabooli kara baahiyahaaga.
- Qareenkaagu waa inuu ka warqabo oo uu kula raadiyo xulashooyinka beddelaada ugu xanibaada yar. Maamulaha kiiskaaga degmada, ururada u doodista ee maxalliga ah iyo bixiyaha iyo hay'ada xarunta ayaa sidoo kale laga yaabaa inay gacan ka gaystaan helitaanka xulashooyin xanibaad yar oo dabooli kara baahiyahaaga.

Si uu kuu siiyo wakiil ka ahaansho wax ku ool ah qareenkaagu waa inuu had iyo jeer ku weydiiyo su'aalaha soo socda.

- Waa maxay natiijada aad ka raadinayso kiiskaaga? Mararka qaar qareenada difaacu waxay iloobaan inay metelayaan danahaaga ee aysan meyleynin dantaada ugu fiican.
- Miyaad hore u qaadatay daawayn caafimaadka dhimirka ah oo miyey kuu shaqaysay?
- Ma leedahay dhakhtarka maskaxda oo kugu daawaynaya bulshada dhexdeeda?
- Ma leedahay xubno ka mid ah qoysaskaaga oo ku taageera, saaxiibbada, iwm?
- Miyaad leedahay mas'uul ama daryeele kaa masuul ah?
- Miyaad leedahay dardaraan hore ee daawaynta maskaxda ah ama dardaaranka daryeelka caafimaad oo la diyaariyey?
- Ma waxbaa isbadalay tan iyo markii degmadu xaraysay codsiga? Eedeymaha ku jira codsigu ma maxay ku salaysanyihiin macluumaad hore?

Bayaanka ADA: Haddii aad naafonimo leedahay oo aad rabto ogaysiiskan oo qaab kale ah waxaad ka dalban kartaa degmada. Macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan habka xukminta daawaynta, la xiriiir Xafiiska sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka, 121 7th Place E., Suite 420 Metro Square Bldg, St. Paul, Minnesota 55101, <https://mn.gov/omhdd/> Cod: 651-757-1800 ama Khadka Bilaashka ah: 1-800-657-3506.